


TALOOYINKA WEEL WAX KU BEERASHADA

Weel wax ku beerasho waxay kuu saamaxi kartaa inaad sida ugu wacan uga faaiido goob cagaaran oo yar. Weel wax ku beerasho waxay xulasho wacan u tahay dadka daggan falaat ama abaartamiinto iyo kuwa kunool guryaha iskaashatada ee leh goob deyr ah ama balokoon. Marka laga reebo geedo waaweyn, ku dhawaad wax kasta ayaa lagu beeri karaa weel. Hoos waxaa ku yaala xoogaa talooyin ah oo aad ku bilaabi karto beertaada weelka!

SIQALABKA GOOBTA & WAXYAABAHA AY TAHAY IN LA TIXGALIYO

IFTIINKA QORRAXDA: Haddii ay macquul tahay, xulo goob leh iftiinka qorraxda oo ku filan oo buuxa ama dhammaystiran (lix saacadood ama ka badan oo ah ifka qorraxda maalintiiba). Way ku habboon tahay in wax lagu beerto meelaha koonfurta u jeedda. Haddii goobtaadu ay hesho wax ka yar lix saacadood oo qorraxda ifkeeda ah oo toos ah, markaa waxaa laga yaabaa inaad tixgeliso beerashada dhirta u adkaysata ama ku korta hadhka ama hooska, sida cagaarka caleenta ah ama geedo yaryar.

BOOSKA: Markii aad u xulanayso weelal dhirtaada, waa muhiim in la ogaado inta boos uu geedkaagu u baahan yahay. Waxaad u baahan tahay weel weyn oo ku filan oo ku habboon nidaamka xididka qaangaarka ah ee geedka.



- **Xididada aan Qotadoodu Dheereyn:** qoto dheer oo lix ilaa sagaal inji ah oo loogu talagalay dhirta xididdada aan qotada dheereyn leh (chives, salaar, basasha cagaaran, isbinaajka)
- **Xididada Qotada Dhexdhexaadka ah Leh:** 12 ilaa 18 inji weel qotadiisu tahay oo loogu tala galay geedaha leh xididada dheerarka meel dhexaadka ah leh (geed ukun ama eggplants, basbaaska, xididdo ama beetroot, karootada, borokoli, kale oo sidoo kalena loo yaqaano sukuma)
- **Xidido qoto dheer:** 18 ilaa 24 inji weel qotadiisu jirto oo loogu talagalay dhirta xididdada qotada dheer gaara (yaanyo, baradhada, zucchini, bocorka jiilaalka, galleyda, qajaarka)



GrowBoston

growboston@boston.gov



CITY of BOSTON

MEEL QULQULKA LOOGU TALA GALAY: Meel qulqulka loogu tala galay waxay si gaar ah muhiim ugu tahay geedaha weelasha lagu abuurto si looga hortago in xididdada ay si xad dhaaf ah usoo baxaan oo baylah u noqdaan biyo iyo bololid. Si loo xaqiijiyo in biyuhu si habboon u qulqulaan, xaqiiji in weelashaadu leeyihiin godad waaweyn oo biyuhu ku qulqulaan oo salka uga yaala. Haddii weelkaagu uusan godad lahayn, waku waxaad duleelin kartaa godad dhanka salka ah aad ka duleelinayso.

ISKU DHAFIDDA DHERYAHA WAXA AY KA SAMAYSAN YIHIIN: Muhiimada gaarka ah ee meesha qulqulka ay u leedahay dhirta weelka darteed, waxaan soo jeedineynaa in la isticmaalo isku darka dheryo wax dhex mari karaan waxa ay ka samaysan yihiin, sida isku darka dheri waxa uu ka samaysan yahay oo dhan wax dhex mari karaan oo ka kooban moss peat [geedo bolalay], vermiculite [nooc macdanta ka mid ah], iyo perlite[wax quraarad oo kale ah]. Isku dhafka dheryaha waxa ay ka samaysan yihiin waxaa laga soo gadan karaa tafaariiqlehaaga maxalliga ah ama waa la samayn karaa ayadoo la isticmaalayo waxyaabo dhowr ah oo muhiim ah sida 1 qeyb oo ah kombosti ah iyo 1 qeyb oo carrada beerta ah. Ku daridda perlite waxay gaar ahaan aad u caawin kartaa geedaha weelasha lagu dhex abuurto sababtoo ah waa macdan la gaar yeelay oo qulqulka sii hagaajin karta.

DAYACTIRKA AMA DARYEELIDDA

WARAABIN: Habdhaqannada waraabinta ee loogu tala galay geedaha weelasha lagu dhex abuurto waxay ku xirnaan doonaan dheryahaagu waxa ay ka samaysan yihiin. Inta badan dhirta weelku waxay u baahan doontaa waraabin hal mar todobaadkii inta lagu jiro xilliga wax tacbashada haddii ay si toos ah u yaalaan iftiinka qoraxda oo ciiddaadu si fiican biyuhu ugu dhex qulqulaan. Si kastaba ha ahaatee, geedaha qeybna qorraxdu hayso qeybna hoos yaala waxaa laga yaabaa inaysan u baahan waraabin joogto ah. Ka sharci guud ahaan, waxaad waraabin kartaa geedahaaga markii dhariga wixii laga sameeyay uu qallalan yahay oo la dareemayo inuu qallalan yahay markii la taabto. Marka ay suurtagal tahay, waraabin dhirtaada subaxdii si aad uga fogaato caaryada iyo in ay biyaha sii lahaadaan maalinta oo dhan ooyan oomin maalintii oo dhan.



BACRIMIN KU DARID: Dharigaaga waxa uu ka samaysan yahay iyo nooca bacrimiyaha aad isticmaalayso ayaa goaamiya inta jeer ee aad u baahanayso in bacrimiye lagu daro geedaha. Haddii aad isticmaalayso bacrimiye aayar usoo baxaya ama dhirta ugalaya, hal mar inaad ku shubto xilligiiba ayaa ku filnaan karta. Komboti waa wax ka baddalid carro oo lagu dari karo waxa dheryahaagu ka samaysan yihiin, laakiin kombosti waxaa uu ka kooban yahay tirooyin yar oo nafaqooyin ah marka waxaad u baahan kartaa inaad adeegsato dhowr jeer hal xilli inta lagu jiro. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad isticmaalayso bacriminta biyaha ku milma ee si degdeg ah usoo baxa, waa caadi inaad bacrimiso dhirta qiyaastii hal mar todobaadkii.

Ilaha: University of Georgia Extension, University of California Division of Agriculture and Natural Resources, Brooklyn Botanic Garden, Cornell Cooperative Extension of Schenectady County. Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden.